## Ururka Waxbarashada Ibnu-Rushd

Ururka Ibnu-Rushd wuxuu ka mid yahay kuwa ugu xiisaha badan ee ka qaybqaata dhismaha bulshada.

waxaan nahay hadda ururka ugu cusub ee sagaalaad ee ku soo biira ururada waxbarashada dalka Swedan. Laga bilaabo 1da bishii koowaad ee sanadka 2008, waxaa naloo aqoonsaday inaan nahay urur waxbarasho oo madaxbanaan xaqna u leh inuu helo deeqda ama gargaarka dawladu ku caawiso ururada waxbarashada.

Ururka Ibnu-rushd wuxuu uxilsaaranyahay su,aalaha muhiimka ah ee ku saabsan wada deganaanta, isdhexgalka bulshada iyo dimuqraadiyada.

Waxaanu kukala baahsanahay 5 gobol laga bilaabo gobolka skåne ilaa gobolka norbotten. Hogaamiyayaasha iyo shaqaalahayagu waa jinsiyado kala duwan, isku duubnidaasi waa wax ay ururada nala midka ahi jecleysan lahaayen oo ay ku riyoodan in ay noqdaan.

Ururkayaga taariikhdiisu waxay bilaabantay bilawgii sanadka 2001waxaanuna ku bilawnay mashruuc ujeedadiisu tahay sidii loo abuuri laha urur waxbarsho oo islaami ah. Hawshaasi fulintedu waxay qadatay 7ba sano anago taagero ka helnay urur horey u jirey ulajeedaduna waxay ahayd sidi aan u noqon lahayn urur madax banaan oo goonina isu taagi kara.

## Magaca Ibnu-rushd

Ibnu-rushd wuxuu dhamaan dadka reer isweedan o uyaha magag qalaad beryaha u horeeya ee ay maqlaan magacan. Ereyga ”ibn” macnaheedu waa ”wiilki” ama ”ina” magaca Rushd macnihiisu waa ”caqligal”.

Ibnu rushd wuxuu ahaa aqoonyahan waain iyo fiilasuuf weeyn ku dhashay magaalada Qurduba ee ku taala dalka speeyn taariikhdu markay ahaayd 1126. Magaciisa laatiinka ah waa AVERROES waxaana lagu naanaysi jiery Faaleeye sababtoo ah qoraladisi ama faaloyinkii faraha badan oo ku saabsan feelasuufkii Aristoteles kutubti u qoray.

Waqtigaa waxaa kobcayey carabtii speeyn ee Aandaluusiya waxa dib usoo noolaaday aqoontii faylasuufyitii griiga ee ku qiimo beeshay Yurubta. Kadib waxaa soo kordhay aqoono cusub dhinaca xisaabta luqadaha, tekniikada, falsafada, dawooyinka,iyo aqoonta diinaha. Waxtigaa luqada carabida ayaa ahayd luqada waxbarashada diinta Islaamkuna diinta ugu balaadhan ee ugu wayn. Muslimiita masiixiyiinta iyo yahuuduna waa isla noolaayeen.

Magaalda Qurduba waxay lahyd maktabad lagu kaydiyo kutub tiradodu gaaneyso ilaa 500.000 oo xabo. Inka badan 20.000 oo xaashadood oo ku saabsanaa daawada, falsafada, qaanuunka iyo aqoonta diimaha ayu Ibn Rushd koray.

Dhamaan dadka reer yurub gaar ahaana dadka swiidishka ah waxay la ta

diinta islaamku wax cusub oo qariib ah. Taasuna maaha wax dhaba marka la raaco taariikhdu siday sheegayso.Diinta islaamku waxay ka qayb qadatay qayblibax sidi haruumarka dhaqanka reer yurub uu kobci laha. U

## UJEEDO IYO ARAGTI

Ururka Ibn Rushd wuxuu u furanyahay qof kasto,

Aragtidayadu waa in ay diinta isaalmku noqoto qayb ka mid ah swedan.

Waa in aan loo arkin wax layaable in la noqon karo muslin swiididh ah.

Ujeedadayadu waa inaan xoojino muslimiinta swiidan, oo dadka aan muslinka ahayna  u soo bandhigno islaamku waxa uu yahay.

Ma rabno in ay musliminta swiiden noqdaan dad dambeeya oo aan ka jawaaba so`alaha dadkale soo bandhigaan.

Waxaan rabnaa in aan noqono dad aad u dadaal badan oo  qayblibaax ka qaata waxyaabaha laga hadlayo.

Waxan rabnaa in aan ahanoo kuwa fikrado cusub keena oo kaa qaybqata dhismaha Swiidhanta cusub.

Fircoonidasi waxay ahaan karta wadahadal ku saabsan diinta Islaamka ama swiidhishnimadu waxa ay tahay. Swiidhishnimada waxaaan u aragana wax isbedel kara oo ay soo geli karaan diimo farabadan iyo dhaqano kal duwan.

## XUBNAHA URURKA

Ibn Rushd maanta waxaa hoos yimaada 8 xubnood dalka gudahiisa

1. Ururka jaaliyadaha islaamka/Förenadeislamiska Föreningar i Sverige (FIFS)
2. Hayda Samafalka islaamka/Islamic Relief (www.islamicrelief.se)
3. Iskaashada islaamka ee swedan/ Islamiska Förbundet i sverige

   (IFIS, www.islamiska förbundet.se)
4. Iskuduubnida muslimiinta Shiicada /Islamisaka Shiasamfundet i Sverige
5. Uuruka Akriska Quraanka/Koranläsarnas Förbund.
6. Hayada dhaqanka Dayaxa Cusub/New Moon Kulturorganisation
7. Ururka muslinka ee Sweedan /Sverige muslimska Förbund(SMF)
8. Ururka kashaafada muslimiinta Swedan/Sverige Muslimska Scouter(SMS)
9. Ururka Dhalinta Muslinka Swedan/Sveriges Unga Muslimer(SUM, www.ungamuslimer.se)

## HAWLGALKA

Hawsha uweeyn ee dhismaha bulshada waxaa kaalin weyn ka qayb qaata xubnaurureedka na hoos yimaada. Hawlwadaqabashadaasi waxay ku hirgashaa fikrad iswaydaarsi iyo bandhig carwooyin. Waxaa kale oo aan qabanqabina koorasyo ko saabsan fagaaraha, diinta, dhaqanka, luqada iyo bulshada. Waxaan bulshada ugu baaqna kulano kala duwan oo xiisoleh oo lagu qabto qaybo ka mid ah dalka gudahiisa

Waxbarkayagu wuxuu gaadha goobaha shaqada, iskuulada, shirkadaha iyo hayadaha.

Harumarinta iyo hogaaminta mashruucyadu waa udubdhexaadka hawlqabashada ururka Ibn Rushd.

Waqtigan xaadirka ah waxan gacanta ku haynaa 2ba mashruuc oo waayn oo  ku sabsan dhismaha bulshada.

## Golaha Degmooyinka, Forix

Golaha Degmooyinku waa qorshe loogu talagalay soo bandhigida aragtida siyaasada ee dhalinyarada dagan degmooyinka kala gadisan ee Sweedhan ay ka koobantahay. Ulajeedaduna waa sidii ay dhalinyaradu u helilahaayeen fursad ay codkooda ku dhiibtaan oo ay iyagu noqdaan kuwa dooda bilaaba. Taasi waxay dhalinaysa sidii ay xisbiyadeena iyo ururdeena hore u dhisnaa ay ogaadan aqoonta guud iyo waxgarashada dahsoon ee laga heli karo degmooyinka.

Qorshahan waxaa habayntiisa ku wada jhira Ibn Rushd, Ururka Dhalinyarada Muslimiinta, Dayaxa Cusub, OIKOSCOMMUNITY iyo Hyllie xaafad ku taal magaalada Malmö.

Qorshahan waxaa kale oo  taagero siiya ururka la yidhaahdo Dhaxalka  Dadweynaha. Waxana lagala xidhiidhi karaa  Othman Al Tawalbeh, othman.tawalbeh@ibnrushd.se.

Soo bandhiga nabadgelyada dhaqanka islaamka

Dhalinyarada muslinka ah ee kukala nool dalka  dacaliidiisa waxaa la siiyey tababar ay ku noqdeen shaqaalo nabaadeed. Waxaa la baray aqoon iyo garasho dheer oo ku salaysan nabadgelyada, ka hortaga dagaalkaiyo xaqooqda aadamaha. Ulaajeedado waa sidii loga hortegi lahaa islaam nacaybka ( cabsida iyo colaada ku wajahan islaamka ee ay qabaan gaar ahaan bulshada reer galbeedku ) iyo västofobi (cabsida  dadka muslinka ah ay ka qabaan dadka caalamka rer galbeed ka ah). Qorshan aan wadno waxa ka dhalan kara oo  uu noqn doonaa aasaaska dhaqdhaqaaq nabadeed oo muslin ah, muslimiinta swiidan oo nabada iyo cadaalada ka taliya xoogana saara wada hadal nabadeed. Qorshahani wuxuu sii soconayaa sanadkan 2009 gudihiisa sidii loo balaadhin lahaa fikrada taliye nabadgelyo ku faafsan gebi ahaan qaarada urub. Taliye nabadeedkayagu wuxuu idinkusoo booqan karaa goobihiina kala duwan  si uu idiinka waramo nabadgelyada iyo informashan kaleba .  Tafaasil intaa kasi badaan waxaan la xiriiri kartaa gudomiyaha wax baraashada Romdhane Boussaidi, romdhane.boussaidi@ibnrushd.se,

KUSOO  DHAWAADA  SIDII  AYNU  WAX  UWADA  QABSAN LAHAYN

KA QAYB QAADO HAWSHAYADA

WAR BIXIN BADAN OO KU SAABSAN  HAWSHAYADA  URUURDHISMAHA  KA  AKHRISO WWW.IBNRUSHD.SE

## halkee nalaga helikaraa?

Xafiisyadayada  kala dowan waxaad kaa helii kartaa www.ibnrushd.se

Laga bilaabo 1da bisha august 2009 waxan deganahay oo nalaga heli karaa cinwaankan Brännkyrkgatan 111 B ee Stockholm.

## Xiriir


Mattias Falk, Agaasime ku meel gaadh ah

Telefon: 08-562 44 901. Mobil: 0707-699093

E-post: mattias.falk@ibnrushd.se

Temmam Asbai, taliye madaxeedka ruruka

Telefon: 0705-09 40 07. E-post: temmam.asbai@ibnrushd.se

Pia Emanuelsson, Masuulka qorshaha-iyo isgaadhsiinta

Telefon: 0766-232269. E-post: pia.emanuelsson@ibnrushd.se